UNTIL WE ARE ALL FREE

Ilamaa inaga oo dhan aan xoroowno: xuquuqda soo galootiga oo la mid noqda xuquuqda jinsiyadaha iyo ku dhawaqidda midnimada.
Waxaa diyariyay NoViolet Bulawayo

Baaq dadka xududyada gudba, cago ka niyad xun dalkoodi lumay. Baaq ku rag madow oo qurxoon, quluubtoodu ku garaacantahey xabado boliis.

Baaq hoyoyin xabis ku jira, caano xabsiga ku halaabay. Baaq meydadki la iloobay, iyo murugo badda Mediterranean dhex yaala. Dadkii dalka ahaa oo ku barakacsan dalkooda dhexdiisa. Baaq kuwa khudradaha gura oo sambabkoodu dageen sunta cayayanka. Baaq "shiheeyaha". Baaq caruurta midabka madow iyo kuwa - midabka bunniga leh oo lagu diyarinaayo skoolo la dayacay si ay xabis u galaan. Baaq walalaha, abayaasha, adeerada, cunaha hala qabto xabisyada imaanka daran. Baaq kuwa dhulka qurxiya, khadaamoyinka, cuntakariyaasha, kuwa caruurta haya, oo cagiihi daaleen. Baaq "kuwa aan sharci leheen". Baaq kuwa xaqoodi la duudsiyay oo meel cidla ah ku sugaaya cadaalad. Baaq walaashii jinsigeda bedeshay oo la dilay hadana magaceedi la iloobay. Baaq muwadiniintii aan dal leheen. Baaq dhiigii qiimaha badnaa oo ay daadiyeen ciidanka wakiilada xuduudaha. Baaq guri laawe ku riyoonaya guri uu leeyahey. Baaq kuwa warshadaha ka shaqeeya oo dhididki ka dhamaaday. Baaq ku kuwa xuquqdooda la duudsiyay. Baaq hoyoyinka ku rafaadsan safka mesha ceyrta laga bixiyo. Baaq walidiin la tarxiilay, ka niyad jabsan caruurtoda lakala waday. Ingaga daalan oo aan cunin hadhuud. Baaq "sharci laawayaal". Baaq kuwa lagaso saaray meelaha khatarta ah oo sugitaan u jooga xero qaxooti. Baaq kuwa midabka bunniga leh oo xabisyada isu dulsaaran sida kaluunka. Baaq saboolka rajo ka qaba mustaqbalka, sitana musawir leh "maxa nagala yelayaa anaga"

Baaqu waa salaad ama duco dhamaanteen u socota. Magacyadeena ayaa muqadas ka dhigaya. Baaqu waa hees na badbadin doonta. Baaqu waa beeyo caafin doonta dadnimadeena dhibateysan. Baaqu waa murayada runta; qalbigeeney aragtaa. Baaqu waa buundada dulmarta xuduudo aan dhulka ka jirin. Baaqu waa iftiin liqa mugdiga aan ku jirno si aan ugu dambeysti u helno iftiinka cadaalada.
Baaqu waa gabayga aaska, oo u ooyaya meydadkii qiimaha badnaa oo boliska iyo wakiilada xadadka. Baaqu waa khariidada aayaha, waxey qeexeysa dunida xorta ah aan rabno in aan ku noolaano. Baaqu waxu ka horjedaa aamusnaan; wuxu ka dhawaaqaa Baltimore ilaa bengaladesh, Ferguson, Johannesburg, Mexico, El Salvador, dhamaan Americas, xabiska Folsom, jid kasto. Syria ilaa, Kosovo, China, Eritrea, Cambodia, Haiti, Karnes County, Texas. Isbarooyinka, aqalkaada dhabarkiis.

Waxaan ku baaqeynaa luqad kasto, ku shegeynaa, dhunteena u daloosha in u codkeena gaaro dunida oo dhan ilaamaa nala maqlo. Ilaamaa la sharfo heesaha jira ee magacyadeeni la qalday ama la dulmiyay,iyo kuwa la aamusiiyay dhamaan. Ilaamaa dagalka aadmiga lagu hayo u dhamaado. Meelna uma socono, halkan iyo meelkasta oo aan joogno, waana baaq ilaa silsiladaha la jaro (isticmaarka), Ilaamaa la dumiyo gidaarada iyo biraha, Lana baabiiyo khadadka iyo xuduudaha, Lana burburiyo saqafka (xakameynta), cadaaladuna deriskeena so gaarto, duniduna meelmariso nolosheena.
Maxaa yeelay adiga xor ma tihid ilaa dhamaanten xor noqono.

Joogsan meyno ilaa dunida ka dhigno meel guryaheena oo kale ah. Waxaan ka baaqeynaa dusha, hoosta, geesaha, hareerahena, dibadaha, iyo meel kasta. Al-baabadaan garaaceynaa, waan mudaharaadeynaa si cadaalad loo helo. Waxaan rab-naa in aan aragno madow iyo bunniga ku nool xuriyad, ayna taaban xabadaha boliska iyo wakiilada xududaha iyagoo aminsan in nolosheena tahay wax lagu cayaro.
Waxaan rabnaa in midabkeena ahaado sida dhayman qaali ah ku dhex marno albaabo aan wejigeena lagu garaceyn. Skuulo qiimo leh. Shaqoyin wanaagsan. Deris nabad ah. Khidmo wanagsan. Fursado nolosha. Jidad aan nalagu baareyn midabkeena dartiis. Wada hadal ra'yigena la maqlo. Meelaha kuwii naga horeeyay ku bananbexeen, ku dagaalameen, lagu daldalay walidinteeni ku ooyeen.

Waxaan u baaqeynaa caruurta waxba galabsan oo ah indhii dunida, ay ku nooladaan nolol dhameystiran oo hub boliss lagu dilin iyagoo korimo ku jira. Kuwa ku dadaala in ay guleystaan, iyagoo heysta cunno, guri, daryeel caafimaad, wax barasho, fursado, jaaceyl, qurux iyo wax kastooo guul gaarsiin kara. Sabatoo ah walidiin ku faraxsan guusha caruur-tooda oo aan xabis ku jurin, oo guriga jooga. Sabatoo ah waxey ku nool yihiin aduun iyaga la dagaalamin, lakin iyaga u dagaalama.

Maxaa yeelay dulmi halkaan ku haray, sharafna halkaan ka bilaabatay.
Waxaan u baqeynaa wadamada damiirka leh dhunkada gacmaha u shagqeya, jid dhib badan u mara, naftooda u hura, quudiya iskuna keena. Waxaan u baaqeynaa wadamada qiimeya kuwa u dadaala sabatoo ah waxey fahmaan luqada abaalka.

Waxaan u baqeynaa wadamada nagu hogaamiya dhulka kulelka badan, dhismoyinka, jikada makhayadaha iyo suuliyaasha wasaqeysan, wadoyinka ku dhex yaala skuulada, dabaqyada shirkadaha o aan xoog ugu shaqeyno kuna dhididno. Waxaan u baaqeynaa wadamada nooga mahad celiya dhul cagaheena daalan ku nastaan. Isla dhulkaas boliiska iyo wakiilada xududaha
wey garan doonaan iney caysh iyo meel har leh na siiyaan. Waxaan u baaqeynaa wadama-da aan na aflagdeyn, oo noo qaderiya si sharaf leh wixii naga lumay iyo wixii aan galnay, fahamsan shaqadeena la' anteedna in iyagana waxba eheen.

Maxaa yeelay qof wuxu qof noqon karaa dad kale daraadood.
Waxaa ugu baaqeynaa isbaaroyinka in ay dhihin, Xagee ka timid? U noqo dalkaadi. Halkan lagaama jeclo. Taasi nalka ifisaa ee, magaceena noogu yeer. Waxaan u baaqey-na wadamada nagu arkaa qalbi wanaagsan, diidana in ay arkaan gerideena. Naga badbaadiya biyaha oo noo keena beeyo dhaawac kasto.
Waxaan u baaqeynaa wadamada u duuban subax kasta in ay xusustaan qiimaha aan leenahay – sida quruxda badan, muhim ah ay weligood noo dayicin. Taa oo qalbiga wanaagsan u leexineysa heesta jiritaankeena, naga sareysiisa calanki guusha, na gaar-siisa mustaqbalkeena iyo cadalad run ah. Maxaa yeelay halkana joognaa, melna uma socono. Maxaa yeelay waan baaqeynaa,

Ilaa anaga oo dhan xorowno. Maxaa yeelay intan ka badan jirta. Maxaa yeelay intan kasii badana wey jiri dontaa.